



(Qofkii ku dhaarta waxaan Ilaahay ahayn wuu gaalobay ama shirki buu la yimid)

Cabdullaahi Binu Cumar Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiibe waxaa laga wariyey inuu maqlay nin dhahaya: maya kacbadaan ku dhaartee, wuxuu ku yiri Ibnu Cumar: lagumo dhaarto cidaan Ilaahay ahayn, anigu waxaan ka maqlay Rasuulka Ilaahay scw isagoo dhahay: (Qofkii ku dhaarta waxaan Ilaahay ahayn wuu gaalobay ama shirki buu la yimid).

[Xadiis Saxiix ah] [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At-Tirmidi, Iyo Axmed]

Nabigu scw wuxuu sheegay qofkii ku dhaarta cidaan Ilaahay ahayn iyo magacyadiisa iyo sifaadkiisa inuu Ilaahay ku kufriyey ama uu shirki la yimid, waayo dhaartu waxay keenaysaa waynaynta cida lagu dhaaranayo, waynayntana Ilaahay kaligi ayey u sugnaatay, laguma dhaarto Ilaahay, magacyadiisa iyo sifaadkiisa cidaan ahayn. Dhaartaasina waxay ka mid tahay shirkiga yar, laakiin hadii qofka dhaartay uu u wayneeyo waxa uu ku dhaartay sida waynaynta Ilaahay oo kale ama ka siidan, markaa wuxuu noqonayaa shirkiga wayn.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3359>

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

